



Qoysaska Qaaliga ahoow,

Imtaxaannaadka Waxbarashada ee Maine (MEA) waxaa ku jira imtaxaannaadka qasabka ah ee Xisaabta, Fanka Luuqada Ingiriiska (ELA)/Suugaanta, iyo Sayniska. Imtaxaanka sanad dugsiyeedka 2021-22, Maine wuxuu adeegsan doonaa NWEA ee fasalada 3-8 iyo ardayda sanadka sadexaad ee dugsiga sare ee maadooyinka Xisaabta iyo ELA/Suugaanta. Ardayda ku jira fasalada 5, 8 iyo sanadka sadexaad ee dugsiga sare ayaa ka qaybgeli doonaa qiimaynta Sayniska Maine. Ardayda ku jira fasalada 3-8 iyo sanadka sadexaad ee dugsiga sare ee qaba naafooyinka ugu badan ee fahanka ayaa sii wadan doona kaqaybgalka Imtaxaanka Gaarka ah ee Gobalada Badan (MSAA) si loo qiimeeyo aqoonta Xisaabta iyo ELA/Suugaanta. Ardayda leh naafooyinka ugu badan ee fahanka ee dhigta fasallada 5, 8 iyo sanadka sadexaad ee dugsiga sare ayaa sii wadi doona inay ka qaybgalaan sayniska MSAA kaasoo waafaqsan Heerarka Sayniska Jiilka Soo socda (NGSS). Ardayda loo aqoonsado kuwo barta Ingiriiska ayaa sidoo kale ka qaybgalaaya qiimaynta sanadlaha ah ee aqoonta Luuqada Ingiriiska, imtaxaanka ACCESS ee ELLs. Ardayda qaba naafooyinka ugu badan ee fahanka ee loo aqoonsado arday barta Ingiriiska ayaa ka qaybgalaaya imtaxaanka gaarka ah ee ACCESS ee ELLs. Dhammaan imtaxaannada waxaa lagu sameeyaa oonleen.

Imtaxaannaadka Waxbarashada ee Maine (MEA) ayaa loo qaadayaa sida soo socota:

Imtaxaanka	Looguna talagalay:
Imtaxaanka ACCESS ee ELLs	Ardayda Ingiriiska barta ee fasallada K-12
Imtaxaanka ACCESS ee ELLs ee gaarka ah	Ardayda ingiriiska barta ee qaba naafooyinka ugu badan ee fahanka ee dhigta fasallada 1-12.
Xisaabtaadka iyo ELA/Suugaanta ee NWEA	Fasallada 3 - 8, iyo sanadka sadexaad ee dugsiga sare
MSAA - Xisaabaadka iyo ELA/Suugaanta Kale	Ardayda qaba naafooyinka ugu badan ee fahanka ee dhigta fasallada 3-8, iyo sanadka sadexaad ee dugsiga sare
MSAA - Sayniska Gaarka ah	Ardayda qaba naafooyinka ugu badan ee fahanka ee dhigta fasallada 5-8, iyo sanadka sadexaad ee dugsiga sare
Sayniska Maine	Fasallada 5, 8, iyo sanadka sadexaad ee dugsiga sare

Ka waalid ahaan, waxaad adeegsan kartaa xogta ku jirta imtaxaannaadka si ay kaaga caawiso ku taageerida cunugaaga guriga iyo inaad la niqaashto macalinka ardaygaaga si aad u aqoonsato waxa, hadday jiraan, ay yihiin taageerooyinka dheeraad ah ee muhiimka ku noqon kara dugsiga. Macalimiintu waxay u adeegsadaan xogtaan, oo ay la jiraan noocyada kale ee xogta maxaliga ah, inay hagaan casharkooda ayna shaqooyin aad gaar u ah iyo fursado waxbarasho siiyaan ardayda. Inkastoo aan hal imtaxaan sawir buuxa ka bixin karin guusha, marka lagu daro talaabooyinka kale, xogtaan ayaa macluumaad muhiim ah ka bixinaysa hormarka ardayga. Marka uusan arday ka qaybgelin imtaxaanka gobalka, xog muhiim ah ayaa lumaysa.

Labadaba Waaxda Waxbarashada ee Maine iyo Degmadeena ayaa ka shaqaynaaya yaraynta tirada imtaxaanka ardayda heerka degmo iyo heer gobal ayadoo haddana la xaqiijinaayo in imtaxaanaadku baxshaan xog macno leh, oo ay fulin karaan macalimiinta, ardayda iyo qoysasku. Waxaan ku kalsoon nahay in tayada casharada ay baxshaan macalimiinteena iyo taageeradaada, in ardaydu ay guul diyaar u yihiin. Waxaan kugu boorinayaa inaad kala xariirto **[INSERT RESOURCES e.g., your child’s teacher/school/administrator]** wixii su'aalo ah ood ka qabi karto MEA ama hormarka ardaygaaga.

Mahadsanid,

[INSERT district/school administrator]